# Noqoshada Muwaadin Maraykan (U.S.) ah

Becoming a U.S. Citizen

Qaar badan oo ka mid ah foomamka USCIS waa ay isbedelayaan iminka! Ka eeg shabakada (USCIS website) si aad u hubiso in aad isticmaalayso foomkii ugu dambeeyey ka hor inta aadan waxba u dirin. Haddii aad u dirto foom khalad ah waxaa dhici karta inaad wax walba dib u bilowdo!

## Maxaan ku heli muwaadin ahaan?

Kuwa kani waa qaar ka mid ah waxyaabaha aad u baahan tahay inaad ogaato hadii aad ka fakaraysid noqoshada muwaadin Maraykanka (U.S.) ah. Kolka aad noqoto muwaadin Maraykanka (U.S.) ah waxa aad helaysaa waxyaabahan:

- Xaqqa aad ku codeyn karto
- Waa aad ka bixi kartaa sahalna dib ugu so geli kartaa wadanka.
- Waxa aad inta badan ka caawin karaa xubnaha qoyskaaga inay yimaadaan kuna noolaadaan wadanka U.S.
- Ilmahaaga ka yar 18 sanno waxa ay noqon muwaadiniin Mareykan ah (U.S.) markiiba.
- Laguma masaafurin karo. Marmar badan dadka aan muwaadiniinta ahayn ee dambiyada gaysta waa la masaafurin karaa.
- Waxa aad ka codsan kartaa shaqooyin dowlada dhexe.
- Waxa aad u yeelan xaquuq qaar ka mid ah gagaarada dowlada sida, (MFIP) iyo (SSI).
- Waxa aad heli kartaa dal ku galka Mareykanka (U.S. passport).
- Badanaa waxa aad ka heli kartaa adeeg fiican kolka aad booqato Safaaradaha Mareykanka (U.S.) ee wadanka dibadiisa ah.

## Ma wax baan ka tanaasuli si aan u noqodo muwaadin?

Waxa aad balan qaadi inaad ka tanaasusho daacad u ahaanta wadankaaga aad u dhalatay, laakiin Mareykanku (U.S.), waa ay kuu ogol yahay iyana inaad sii ahaato muwaadin wadankaagii aad u dhalatay ah. Noqoshada muwaadin Mareykan (U.S.) ah waxa ay bedeli kartaa xaquuqdaadii aad ku lahayd wadanka aad u dhalatay. Wadan walbaa waxa uu leedahay xeerarka u gaar ah. Hubi xeerarka wadanka aad u dhalatay. Wadanka aad u dhalatay waxyaabaha aad xaqqu u lehayd ee aad waayi karta waxaa ku jira:



- Muwaadinimadaada
- Xaqqa aad ku codeyn karto
- Xaqqa ah inaad hanti halkaa ku yeelan karto.

Waxyaabahani iyana waxaa dhici karta inay isbedelaan:

- Xaquuqdaada haysashada ilmaha
- Xaquuqdaada aad ku gali karto wadanka aad u dhalatay
- Waxaa dhici karta inaad u baahato ruqso shaqo inaad hesho si aad uga shaqeyso wadanka aad u dhalatay ka.

## Ciddee noqon karta muwaadin Mareykan ah (U.S.)?

Waa khasab inaad:

- Ugu yaraan aad jirto 18 sanno hadii aad kaliyaa xareysanayso.
- Aad lahayd deganaanshahaaga sharci ah muddo 5 sanno ah. Kaliya waa **3** sanno hadii aad is qabtaan aadna la noolayd qof muwaadin Mareykan ah (U.S.) ah ugu yaraan 3 sanno ama hadii laguu ansaxiyey codsi (VAWA) oo ku salaysan guursi muwaadin Mareykan ah (U.S.), (I-360 adigu isu xareyn).
- Ku noolayd isla gobolk muddo ka badan 3 sanno.
- Aad sharaf iyo anshax wanaagsan leedahay
- Ku dhaarato inaad wadanka Mareykanka (U.S.) aad daacad u noqonayso.
- Balanqaad ah inaad caawiso wadanka U.S waqtiga dagaaladda ama xaaladaha kale ee qaran ee degdeg ah lagu jiro.
- Akhriyi karto, qorina karto kuna hadli karto Afka Ingiriiska aadna wuxuun ka taqaan Taariikhda iyo dowlada wadanka Mareykanka (U.S.). Waxaa dhici karta inaadan marin imtixaanada Afka Ingiriiska iyo taariikhda ah – hoos ka eeg taa.



## Ilmahaygu mi noqon doonaan muwaadiniin iyana?

Ilmaha ka yar 18 ka sanno waxa ay noqon karaan muwaadiniin Mareykan (U.S.) ah kolka waalid uu noqoto muwaadin hadii:

- 1 waalid uu muwaadin noqdo ka hor intaa aan ilmahu gaarin 18 sanno, **IYO**
- In ilmahu uu haysto sharci dagaansho rasmi ah, **IYO**
- Ilmaha inuu haysto waalidka muwaadinka ahi (xataa muddo yar), **IYO**
- Ilmahu uusan guursan kolka waalidku uu noqday muwaadin.

Hadii aad haysato cadeymaha saxda ah ee waxyaabahaa, ilmahu waxa uu hel karaa warqada muwaadinimada Mareykanka (U.S.) ama dal-ku-galka Mareykanka (U.S. passport). Eeg warqadayada xogta Aruursan ee *Dhalashada Muwaadinimada Mareykanka (U.S.) Cadeynta Muwaadinimada Ilmahaaga*.

## Siddee ayaan ugu diyaar garoobaa imtixaanka?

Xataa hadii aadan aqoon Afka Ingiriiska, faraha ha ka qaadin. Qaado fasalada Afka Ingiriiska iyo muwaadinimada ah. Qaar badan oo fasaladaas ahi waa lacag la'aan. Si aad u ogaato fasalada Afka Ingiriiska iyo muwaadinimada ee agagaarkaaga laga heli karo, wac hay'ada Talo siinta Far-barashada (Minnesota Literacy Council) ee khadkeedu yahay 1-(800) 222-1990 ama dhambaal (text) (612) 424-1211. Ama gal shabakada ah http://mnliteracy.org/.

## Ma khasabaa inaad barto Afka Ingiriiska?

Haa. Laakiin haddii aad tahay:

- 55 jir ah ama ka weyn oo haystay sharciga deganaant rasmiga ah 15 sanno ama,
- 50 jir ah ama ka weyn oo haystay sharciga deganaanta rasmiga ah 20 sanno ama

waa lagaa rabaa inaad ku gudubto imtixaanka taariikhda Mareykanka (U.S.) iyo dowlada ah, laakiin waxa aad ku qaadan kartaa imtixaanka afka aad u dhalatay. Khasab ma aha inaad barato afka Ingiriiska.

Haddii aad tahay:

- 65 jir ama aad ka weyn tahay aadna lahayd sharciga degnaanshaha rasmiga ah ugu yaraan 20 sanno

Waxa aad ku qaadan kartaa qayb aad u sahlan oo ah imtixaanka taariikhda iyo nidaamka dowladda Mareykanka (U.S.) afka aad u dhalatay.

## Ka wadan hadii aanan baran karin Afka Ingiriiska?

Hadii aadan baran karin Afka Ingiriiska, taariikhda iyo dowlada sababto ah cudur aad qabto awgii, waxa aad codsan kartaa "Saamixid." "Saamixida" macnaheedu waa ma aha inaad ku marto wareysiga Afka Ingiriiska ama aha inaad qaadato imtixaanka taariikhda iyo nidaamka dowliga ah.

Ha kuu soo buuxiyo dhaqtarkaagu, Saykolojistahaagu, ama dhaqtarkaaga duugduugu foomka la yiraa USCIS Form N-648. Waxaad kalood ka heli kartaa khadka (online) ka ee shabakada www.uscis.gov. Geli N-648 santiuukha baarida. Sidoo kale boostadda waa laguu soo dhigi karaa foomka haddii aad ka buuxiso dalbasho foomka ah barta www.uscis.gov/forms/forms-information/forms-by-mail.

Waydii dhaqtarkaaga ka hor inta aadan u dhiibin foomka in kaarka caymisku uu bixiyo lacagta waqtiga sameynta foomka. Waydii dhaqtarka inuu si faahfaahsan u yiraa waxa uu yahay cudurka aad qabtaa iyo sida uu kaaga hortaagan tahay wax barashada.

## Ma kharash baa ku baxa codsiga muwaadinimada?

Haa. Khidmadu waa $760. Waxaa dhici karta inaad awoodo inaad waydsiiso laanta socdaalka (immigration) inaad ku xareysato codsiga bilaash ama aad bixiso khadman hoose haddii:

- Aad qaadato manfacyadda gobolka ama kuwa dowladda dhexe sidda MFIP, SSI, ama MinnesotaCare ama
- Haddii aad danyar tahay ama darxumo dhaqaale ay ku haysato

Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Saamixida Khidmadaha Laanta Socdaalka*

## Ma inaan la halaa qareen inta aanan codsan?

Kiisaska intooda badan, waa talo fiican inaad qareen hesho. Qareenku waxa uu ku siin karaa talo ku saabsan inaad codsato iyo in kale iyo sida loo buuxsado warqadaha. Qareen ayaa sidoo kale ku siin kara talo ku saabsan hadii ay jiraan wax khatar ah oo ah in lagu musaafurin karo iyadoo sababtu tahay wax taariikhdaada horey ugu jiray. La hadal qareen hadii:

- Aad ku kharash garayso waqti ka badan 6 bilood dibada U.S., intii aad timid Mareykanka (U.S.)
- Aad lahayd dhibaatooyinka khamri ama maandooriye isticmaal, oo uu ku jiro Qaadka (Khat) ama maandooriyeyaasha mamnuuca ah.
- Lagu xiray ama lagugu eedeeyey dambi, xataa haddii la tirtiray.

- Lagugu soo eedeeyey ama lagugu helay tacadi qoyska dhexdiisa ah ama ciddi ay adiga kaa qaadatay Amarka Amaan Siinta. (OFP)
- Aad ku jirto xabsi dowlo ama seeta dheerayn (probation).
- Aadan bixin masaariif ilmood oo ay ahayd inaad bixiso 5tii sanno ee la soo dhaafay.
- Aadan xareyn canshuur kolkii lagaa rabay inaad xareyso ama lagugu leeyahay canshuur.
- Aad qof kale isqabteen kolkii aad soo gashay wadanka (U.S.), laakiin waxa aad codsigii halkan imaanta aad ku qoratay inaad ahayd “ilmo qaxooti ah oo aysan cid isqabin”.
- Aadan runta u wada sheegin hay’ada laanta socdaalka (Immigration) hada ka hor.
- Aadan isu diiwaangelin qafaalka militariga wadanka adigoo nin da’ yar oo da’diisu u dhexayso 18 iyo 26-jir.
- Aad ka mid ahayd hada ka hor Xisbiga Hanti-Wadaaga.
- Aad ka mid ahayd koox cunsuri ama nacayblayaal ah, ama koox doonaysay inay af-gambido dowlada Mareylanka (U.S.).
- Aad qabto wax su’aal ah oo ku saabsan wixii isbedel ah ee noloshaada ku soo kordha ee saameyn kara sharcigaaga.
- Aad Doonayso inaad magacaaga bedesho iyadoo qayb ka ah nidaamka qaadasahda muwaadinimada.
- Aad u malaynayso inuu amray in lagu masaafuriyo xaakim laanta socdaalka (immigration) ah, ama aadan hubin.

Ku Sheeg runta codsigaaga iyo wareysigaba. Hal dacwo oo dukaan wax ka xadid ahayd 10 sanno ka hor waxaa laga yaabaa inaysan kaa hor istaagin noqoshada muwaadin, laakiin been ka sheegida arrintaa waa ay kaa hor istaagi kartaa.

## Wac Caawimaad

Barnaamijka Gargaarka Dhanka Sharciyada ee Laanta Socdaalka
(Legal Aid’s Immigration Law Project) ee 1 (877) 696-6529

Rugta Sharciyada Muhaajiriinta (Immigrant Law Center) ee 1 (800) 223-1368

Adeegyada Qaxootiga, Muhaajiriinta, iyo Doolaalka ee SMRLS
(SMRLS Refugee, Immigrant and Migrant Services) ee 1 (877) 696-6529



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**